



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 27, 2022

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hay'adaha Maamulka Kiiska (CME)  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Deeqo lacageed oo lagu taageerayo hawada nadiifta ah, hoyga la isku diiriyo la iskuna qaboojiyo

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon Xafiiskeeda Maamulka Wax u adkeysiga iyo Xaalada Degdega ah (OREM) ayaa isku diyaarinaya xilliga dabka kaynta iyo cimilada aadka u daran ee 2022. OREM ayaa waxay qaybinaysaa \$7 milyan oo ah dhaqaale la siinayo dowladaha hoose, Tribal Nations iyo bixiyayaasha waxbarashada dadweynaha si ay u martigeliyaan:

- Meelaha hawada nadiifta ah leh ee xaalada degdega ah inta lagu jiro dabka kaymaha dhacdooyinka kale ee tayada hawadu liidato.
- Meelaha la isku diiriyo la iskuna qaboojiyo oo loogu talagalay dhacdooyinka cimilada aadka u daran.

Tani waa fursad loogu talagalay hay'adaha daryeelka bixiya iyo CME-yada leh meelo waaweyn oo raba in ay caawiyaan bulshada inta lagu jiro xaaladaha degdega ah ee dhanka cimilada si ay ugu lug yeeshaan.

Haddii aad tahay CME ama hay'ad wax bixisa oo xiriir la leh dowlad hoose, Tribal Nations ama waxbarasho dadweyne, waxaa dhici karta in aad u qalanto. Haddii aadan hubin ama jeclaan lahayd in aad sameyso wada shaqeyn kaa dhigi karta in aad u qalanto, fadlan [la xiriir maamulaha xaaladda degdega ee degaankaaga si aad u sii raadsato tani](#).

Deeqaha lacageed waxay taageeri doonaan wax bilaabida hore iyo kharashyada dhanka isla talinta, wanaajinta sifeynta hawada, iyo dejinta ama wanaajinta meelaha la isku diiriyo, la isku qaboojiyo iyo hawada nadiifta ah.

Shuruudaha la iskaga baahan yahay

- Hoy kastaa waa in uu oggolaadaa in uu dadweynaha ugu furnaado lacag la'aan.
- Marka ay furan yihiin, waa in ay soo ogeysiiyaan 211.

[Faahfaahin iyo macluumaad dheeraad ayaa laga helayaa website-ka OREM](#), oo uu ku jiro [codsi](#).

Waad ku mahadsan tahay in aad tixgelin siiso fursadani.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).